



Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah

San Diego City Schools waxay ardeyda ku nool aaga deegaankooda u fidisaa barnaamijyo kala duwan, waxay kaloo ardeydu ikhtiyaar u leeyihiin inay iska diiwaangeliyaan dugsiyo kale oo aan ahayn dugsiyada aaga deegaankooda ku yaala, kuwaas oo ay ka mid yihiin barnaamijyada Magnet, Choice iyo barnaamijyada Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah ee Jinsiyadaha ee loo yeqaano VEEP.

Barnaamijyada Magnet

Manhajka caadiga ah ee dugsiyada waxaa u dheer in barnaamij kasta oo Magnet ah u helo kheyraad dheeraad ah, kaas oo u suurtoogelineya inay helaan maadooyin takhasus ah, qalabka iyo walxaha wax lagu barto, shaqaalaha iyo waxyaabo kale oo badan. Dugsiyada Magnet waxay ahmiyada saaraan maadooyin gaar ah sida saayniska, barashada adabka aadanaha, farshaxanka, muusikada, bandhigista farshaxanka, iyo barashada luuqada labaad taas oo ardeyda ka caawineysa waxbarashadda isku dhex jirta.

• Maanta dugsiyada Magnet waxay leeyihiin afar yool iyo astaamood oo aasaasi ah:

1. Waxay leeyihiin kala duwanaansho ay si cad ujeeddadooda uga muuqato;
2. Waxay isku deyaan in dhammaan ardeyda ka qeybgasha barnaamijka Magnet ay waxbarashadooda hagaajiyaan;
3. Waxay fidiyaan manhaj gaar ah ama sida ay waxbarashadda u arkaan;
4. Waxay soo jiitaan ardeyda ku nool deegaankooda aag ka baxsan.

Barnaamijka Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah ee Jinsiyadaha (VEEP)

VEEP waa barnaamij isku dhexjir ah oo ay ardeyda ka kala timaada jinsiyadaha kala duwan ay iskadiiwaangelineyaan dugsiyada ka baxsan aaga deegaanka ay ku nool yihiin. Dugsiyada ay ku badan yihiin ardeyda cadaanka ah waxaa lagu "Iammaaneyaa" dugsiyada ay ku badan yihiin ardeyda aan cadaanka ahayn si ay waxbarashadda degmada iyo jaaliyada San Diego uga muuqato kala duwanaanshaha jinsiyadaha ee ardeyda. Dugsiyadaas Iammaaneysan darteed, ardeyda ku jirta barnaamijka VEEP waxay ka qeybgeli karaan waxbarashadda isku dhexjirta ee dugsiyada hoose ilaa iyo kuwa dhexe iyo sare.

• VEEP waxay siisaa:

1. Fursado waxbarasho la kobciyey
2. Dhammaan barnaamijyada iyo adeegyada dugsiyada fidisaa marino cadaalad ah
3. Taageero tayo leh oo ka timaada maamuleyaasha aaga, macallimiinta iyo la-taliyaasha
4. Barnaamijka fasalada Xanaanada ilaa iyo 12aad ee u oggolaaneya ardeydu inay sii wadaan waxbarashadooda dugsiyada hoose ilaa dhexe ilaa iyo sare haddii uusan ardeydu ka bixin nidaamka dugsiyada VEEP
5. Ardeyda xaqa u yeelata gaadiid ayaa la siiyaa

Barnaamijka "Choice"

Barnaamijka "Choice" ee San Diego City Schools waxay ardeyda fursad u siisaa inay galaan dugsi aan ahayn dugsiyada deegaankooda ku yaala. Dugsiga barnaamijka Choice wuxuu u oggolaaneya ardeyda inay codsan karaan dugsi kasta oo ku yaal Dugsiyad Middoobey ee Degmada San Diego, marka laga reebo dugsiyada magnet. Iska diiwaangelinta Choice waxay ku xadidan tahay dugsiyada ay boosas uga bannaan yihiin ardeyda dheeraadka ah. Barnaamijka Dugsiyada Choice ardeyda soo galeysa gaadiid ma siiyaan. Ikhtiyaariyada Choice waxaa laga yaabaa inay ku xadidan tahay sharciga dawlada-dhexe ee dhigeysa Inaan Ilmo Qudheeta la Dayacin.

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijyada Magnet, "Choice" iyo VEEP ama aad arjiga ka heli karto, waxaad eegtaa shabakada Internetka(website) "Enrollment Options" (Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah), oo ah : <http://enrollmentoptions.sandi.net/>.

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundation

SOMALI VERSION: ENROLLMENT OPTIONS 2003

Warbixinta kala xidhiidh: Enrollment Options: (619) 725-5672

Su'aalaha Warbaahinta : (619) 725-5578

<http://enrollmentoptions.sandi.net/>

Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmada waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsanaysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.